**Taariikh: 31/12/2018**

**SHARCI LR.134**
**OGGOLAANSHO ANSIXINTA SHARCIGA**
**DHISMAHA HAY'ADDA NAAFADDA QARANKA**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, ee Dastuurka KMG
**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, ee Dastuurks KMG
**MARKUU ARKAY:** Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka Ref:197/03/03/B-10/18 taariikh 27/12/2018 kuna saabsan SHARCIGA DHISMAHA HAY'ADDA NAAFADDA QARANKA ee ay ansixiyeen labada Aqal ee Baarlamaanka
**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo dhismaha Hay'adda Naafadda Qaranka.

**Waxuu Madaxwaynaha soo saaray Xeerkaan**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday ansixinta labada Aqal Baarlamaanka ee Sharciga Dhismaha Hay'adda Naafadda Qaranka.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

**MUQDISHO: 31/12/2018**

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA (-) OFFICE OF THE PRESIDENT

Madaxweynaha J.F.S
**Maxamed Cabdullaahi Maxamed "Farmaajo"**

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Aqalka Sare
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشيوخ
مكتب الرئيس

Federal Republic Of Somalia
The Upper House
Office Of The Speaker

Ref: 241/18 :الرقم

Taariikh: 12/12/2018 :التاريخ

Ku:- Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS =Muqdisho=
Og:- Xogayaha Guud ee Golaha Aqalka Sare BFS =Muqdisho=
Og:- Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka JFS =Muqdisho=
Og:- Garyaqaanka Guud Ee Dowladda =Muqdisho=
Og:- Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

**Ujeeddo:**

**Soo Gudbin Qaraar Gole (Ansixinta Sharciga Dhismaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah)**

Mudane Guddoomiye,

Salaan diirran kadib, waxaan kuu soo gudbinayaa Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee tirsigiisu yahay **Tix:GAS/B-10/KF5/03/2018** kuna taariikheysan **12ka Diseembar 2018** kuna ansixiyay Goluhu **Sharciga Sharciga Dhismaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah:**

- Waxaa codeeyay: **31 Senatar.**
- Waxaa oggolaaday: **31 Senatar.**
- Waxaa diiday: **0 Senatar.**
- Waxaa ka aamusay: **0 Senatar.**

Sidaas darteed, Mudane Guddoomiye, waxaa halkan ku lifaaqan Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee kor ku xusan iyo nuqulka sharciga uu Goluhu soo ansixiyay si aad uga gudataan waajibka dastuuriga ee la idiin igmaday.

Iga guddoon qadarin.

**Sen.Cabdi Xaashi Cabdullaahi**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## GOLAHA AQALKA SARE
## BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# QARAAR GOLE

# ANSIXINTA SHARCIGA DHISMAHA HAY'ADDA QARAN EE DADKA NAAFADA AH

Muqdisho,

12ka Diseembar 2018

**Tix:** GAS/B-10/KF4/03/2018
Kalfadhiga 4aad
Kulankiisa 11aad

**Taariikh:** 12 Dec.2018

## GOLAHA AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**MARKUU AKHRIYAY:**

Sharciga Dhismaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah ee ay soo curisay nuqulkiisii hore Xukuumadda Federaalka uuna soo ansixiyay Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya una soo gudbiyay Golaha Aqalka Sare **27/11/2018**; si uu uga guto waajibka Dastuuriga ah ee loo igmaday.

**MARKUU ARKAY:**

**Qod.82aad** iyo **Qod.83aad** ee Dastuurka Ku Meel Gaarka ah iyo **Qod.49aad** iyo **Qod.50aad** ee Xeer Hoosaadka Golaha Aqalka Sare.

**MARKUU ARKAY:**

**Qod.61aad (1)** ee Dastuurka Ku Meel Gaar-ka ah.

**MARKUU TIXGELIYAY:**

Soo jeedinta in Sharciga Dhismaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah loo ansixiyo sida uu ku soo ansixiyay Golaha Shacabka.

**MARKUU GAROWSADAY:**

In danta dadka naafada ah ay ku jirto in la meel mariyo Sharciga Dhismaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah.

**ISAGA OO KU KULANSAN:**

Kalfadhiisa 4aad, kulankiisa 11aad, oo ay soo xaadireen **32 Senatar** (Soddon iyo Labo Senatar).

**WUXUU GUDDOONSADAY QODOBADA HOOS KU XUSAN:**

**Qod.1aad**

Golaha Aqalka Sare wuxuu cod wada oggol ah ku ansixiyay **Sharciga Dhismaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah** isaga oo aan waxba ka beddelin.

**Qod.2aad**

Qaraarka Golaha Aqalka Sare waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya si uu uga guto waajibka Dastuuriga ah ee loo igmaday.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ
AQALKA SARE

**Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

# Sharciga Aasaaska Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada Ah

Sharciga Dhismaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada Ah

## Gogoldhig

Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka, oo fulineysa tilmaanta Ra'iisul Wasaaraha, barnaamijka Xukuumadda iyo waajibaadkeeda shaqo ee la xiriira ilaalinta xuquuqda iyo badbaadinta shacabka, waxa ay soo diyaarisay Sharciga aasaaska Hay'addda Qaran ee Dadka Naafada ah. Sharcigani waxa uu awood siinayaa dadka Naafada ahi in ay helaan Hay'ad xuquuqdooda u doonta, isla markaana u abuurta fursado isugu jira dhinacyada dhaqaalaha, waxbarashada, shaqada, fududaynta dhinaca isu-socodka, helitaanka xogta iyo in dadkaasi ay helaan matalaad siyaasi ah intaba.

Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanku, iyada oo:

1) Garwaaqsan tirada badan ee dadka la nool naafanimada heerarkeeda kala duwan iyo caqabadaha ku hareeraysan;
2) Tixgelinaysa Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo xuquuqda uu siinayo muwaadiniinta Soomaaliyeed iyo qof kaska oo si sharci ah ugu nool Dalka Soomaaliya oo ay mudnaan gaar ah leeyihiin dadka naafada ah;
3) Tixgelinaysa Axdiga Qaramada Midoobay iyo dhammaan heshiisyada Caalamiga ah ee khuseeya Xuquuqda Aadanaha, gaar ahaan Xeerka Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Dadka Naafada ah, iyo heshiisyada caalamiga ah ee dhaqan galka ah ee laga gaaray in qof walba uu leeyahay xuquuqda iyo xorriyadaha ku xusan heshiisyadaas, iyada oo aan la kala soocayn.
4) Aqoonsanaysa in dadka naafada ah ay u baahan yihiin in ay fursad u helaan isticmaalka adeegyada bulshada ee jira iyo baahida in loo abuuro fursado khaas ah si ay u helaan adeegyada bulshada sida waxbarashada, caafimaadka, dhaqaalaha iwm;
5) in Loo dhiso Hay'ad u doodda xuquuqdooda, u raadisa fursado waxbarasho, shaqo iyo in tixgalin gaar ah ay u helaan qoondo fursad kasta ee bulshada inteeda kale u furan.
6) Tixgalinaysa in dadka Naafada ahi tan iyo xorriyaddii JFS aanay helin xuquuq gaar ahaaneed oo Dastuur ah, sidaas darteed dhismaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ahi waxa uu siinayaa awood ay ku xaqiijiyaan xuquuqda ka maqan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

Golaha Aqalka Sare
The Upper House
27 NOV 2018
SOO GELID / RECEIVED

7) Garwaaqsan in ansixinta sharcigani uu si wax ku ool ah hoos ugu dhigi doono ama dabar jari doono caqabadaha dadka Naafada ah ee ka hor taagan in ay helaan fursado la mid ah dhigooda aan naafada ahayn.
8) Garwaaqsan in sharcigani uu ilaalinayo sharafta iyo karaamada dadka Naafada ah, uuna xoojinayo in ay noqdaan muwaadiniin leh xuquuq la siman inta kale, Hay'addu waxa ay u taagnaan doontaa doonista dhammaan xuquuqda dadka Naafada ah, iyada oo aan loo kala soocin lab iyo dheddig, rayid iyo ciidan.

Magaca Sharciga (Cinwaan gaaban), sharcigan waxaa loogu yeerayaa, ka dib marka la meelmariyo, Sharciga Aasaaska Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah ee JFS (2018).

## Qodobka 1aad:

## Qeexid

Haddii aan sharciga gudihiisa si kale loogu micneyn ereyada soo socda waxaa loola jeedaa micnaha mid kasta ku hor qoran:

1) Hay'ad Qaran: waxaa loola jeedaa Hay'ad madax bannaan, oo heerka Dowladda Federaalka ah, waxayna qaabilsan tahay arrimaha dadka naafada ah ee lagu dhisay Qodobka 2aad ee sharcigan.
2) Guddiga Sare ee Maamulka: waxaa loola jeedaa guddiga ugu sareeya maamulka Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah ee lagu dhisay Qodobka 7aad ee sharcigan.
3) Guddoomiyaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah: waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Guddiga Sare ee Maamulka, ahna Madaxa Hay'adda Dadka Naafada ah.
4) Naafo: Iyada oo laga duulaayo ujeedada sharcigan, dadka naafada ah waxaa soo gelaya qof kasta oo la nool naafonimo jir ahaaneed, mid dareen ahaaneed, mid maskaxeed iyo mid dhinaca garashada ama garaadka la xiriirta, taas oo uu qabo/qabay muddo dheer, laguna daray saamaynta caqabadaha curyaaminaya ee kaga imaanaya bulshada ama deegaanka oo sababaya in qofku gaaro heer uu nolol maalmeedkiisa caadiga ah u maamuli karaynin ama u maarayn karaynin sida dadka kale.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ
AQALKA SARE

## Qodobka 2aad:

## Dhismaha Hay'adda Qaranka ee Dadka Naafada Ah.

1. Waxaa la dhisay hay'ad heer Federaal ah oo u xil saaran arrimaha dadka naafada ah, oo lagu magacaabo "Hay'adda Qaranka ee Dadka Naafada ah", hadda ka dib na waxaa loogu yeerayaa 'Hay'adda".
2. Hay'addu waxay u madax bannaan tahay fulinta, dhammaan hawlaha la xiriira dadka naafada ah, si waafaqsan shuruucda Dalka, waxayna meel marinaysaa shaqooyinka iyo qorshayaasha la xariira dadka naafada ah, iyadoo aysan ka qaadayn ama aysan ka hor imaanaynin, hay'adaha kale ee qaranka gudashada waajibka ka saaran daryeelka iyo u adeegidda dadka naafada ah, si waafaqsan Dastuuka, shuruucda dalka iyo Xeerarka caalamiga ah.
3. Hay'addu waxay yeelanaysaa:
   a) Guddi fulin oo ka kooban Guddoomiye, Guddoomiye ku Xigeen, Xoghaye Guud iyo labo xubnood, (wadar ahaan shan xubnood), dhamaantood na waa in ay noqdaan dad naafo ah.

   b) Hoggaan dheelli tiran oo haddii uu midkood Guddoomiye noqdo (Lab ama Dheddig) Guddoomiye ku xigeenku waa in uu noqdaa jinsiga kale;

   c) Ka dib soo jeedinta Wasiirka Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka (WHHXI), waxa Hogaanka Hay'ada ansixinaaya Golaha Wasiirrada. Xil ka qaadistooda waxa loo raacayaa isla hanaankii loo maray ansixintooda.

   d) Muddada xil haynta hoggaanka Hay'addu waa afar (4) sano oo mar kaliya la cusboonaysiin karo, waxaana hadda ka dib loogu yeerayaa hoggaanka Hay'adda Qaranka ee Dadka Naafada ah oo ah sida ku cad farqadda 3aad xarafka (b).

4. Hay'addu waxa ay fulinaysaa qorshe siyaasadeedka xukuumadda Fedaraalka ah ee Soomaaliya, ee khuseeya arrimaha dadka naafada ah, waxayna kala shaqaynaysaa hay'adaha iyo wasaaradaha kala duwan ee heer Federaal iyo heer Dawlad Goboleed.

a) Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka ayaa leh hagidda siyaasadeed ee Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah;
b) Hay'addu waxay u madax bannaan tahay howlaheeda shaqo;
c) Guddoomiyaha Hay'addu waxa uu warbixinta Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah toos u siinayaa Wasiirka Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqal Insaanka.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ
AQALKA SARE

# Qodobka 3aad:

## Saldhigga Sharci ee Hay'adda.

Hay'addu waxay u hoggaansamaysaa Sharciyada iyo Xeerarka soo socda:

1. Xuquuqda muwaadinka ee ku xusan Dastuurka KMG ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
2. Sharciyada Shaqada iyo Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda;
3. Shuruudaha iyo Xeerarka habka Xisaabaadka & Hanti-dawrka Dawladda;
4. Shuruucda iyo Xeerarka la xiriira xuquuqda dadka naafada ah;
5. Dacwadaha khuseeya go'aannada Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, waxaa loo marayaa hab qaanuuni ah ee sharciyadda Dalka waafaqsan;
6. Dadka Naafada ah ee shisheeyaha ah ee ku sugan Dalka gudihiisa, waxaa u xilsaaran ilaalinta xuquuqdooda iyo dabagalkoodaba Hay'addan, iyadoo lagu dhaqayo shuruucda Dalka u degsan ama loo dejin doono;

# Qodobka 4aad:

## Maqaamka Hay'adda.

1. Hay'addu waxay leedahay shaqsiyad sharciyeed, waa la dacweyn karaa, waxna wey dacwayn kartaa, ayadoo la raacayo qaabka ay Hay'adaha Dowladdu wax u dacweeyaan, waxayna u gudanaysaa adeegga ay bixinayso si sharcigu u ogol yahay ee lagama maarmaanka u ah gudashada waajibaadkeeda.
2. Hay'addu waxay leedahay shaabad iyo calaamad u gaar ah.

# Qodobka 5aad:

## Xilka iyo Waajibaadka Hay'adda.

1. Xilka iyo waajibaadka Hay'addu, waa in ay qaabayso, horumariso, isla markaana hirgeliso qorshaha Dawladda Soomaaliya ee ku saabsan dadka naafada ah, iyada oo la hubinayo xaqiijinta helista fursado dhinac walba ah oo ay helaan dadka naafada ah.
2. Iyada oo aan waxba loo dhimaynin Hay'addu, waxay u fulinaysaa xilalka iyo waajibaad kale ee guud ama gaar ahaaneed ee uu sharciga ama xeer hoosaadku uu u xilsaaray sida soo socota:

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

a) Hay'addu waxa ay door hormuud ah ku leedahay hawlaha lagu curinaayo, lagu saxaayo, amaba lagu midaynaayo shuruucda dalka ee khuseeya dadka naafada ah.

b) hay'adu waxa ay masuul ka tahay hubinta in xafiisyada dawladda iyo goobaha caamka ee dadweynaha ay yeeshaan marino ama qalab u sahli kara dadka naafada ahi in ay soo geli karaan.

c) In wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee dawladdu, wixii shaqadooda ka khuseeya Dadka Naafada ah, ay Hay'adda kala tashadaan xiliga qorshaynta, marka ay fulinta timaaddo na, in Hay'addu ay door ku yeelato.

d) Asaasto xarumo gaar ah oo dadka naafada ah lagu tababaro;

e) Hubiso sidii dadka nafada ah ee heer federaal iyo heer dawlad goboleed ay ku heli lahaayeen fursado buuxa oo ay bulshada kale kula wadaagaan adeegyada waxbarashada ee Dalka gudahiisa iyo kuwa dibadda loo aado, fursadaha shaqooyinka, adeegyada caafimaad, ka qayb qaadashada guud ee dhaqdhaqaaqyada bulsho sida ciyaaraha (sports), iyo ka qayb qaadashada dhaqdhaqaaqyada siyaasadeed ee heer walba leh;

f) Hubiso gacan ku haynta xogta dadka naafada ah ee dalka oo dhan laga soo sooco tiro-koobyada guud ee dadwaynaha;

g) Hubiso meel marinta siyaasadda Qaran ee ku saabsan fududaynta dhaqdhaqaaqa maalinlaha ah ee dadka naafada ah warbixin joogta ahna ka siiyaan WHHXI;

h) Hubiso in qoraallada rasmiga ah ee dadka naafada ah ku socdaa ay ku soo baxaan hab ay akhrin karaan, sida Bareel, farta ishaarooyinka, iyo wixii la mid ah;

i) Hubiso, isla markaana daba gasho, sidii Dawladda Soomaaliya ay si buuxda uga mid noqon lahayd heshiisyada caalamiga ah iyo kuwa goboleed ee ku saabsan xuquuqda dadka naafada ah, si buuxdana u dhaqan geliso waajibaadka ka saaran meel marinta iyo wax ka beddelidda sharciyada dadka Naafada ah ee aan la socon karin heshiisyadaas;

j) Qabanqaabinta iyo abaabulka shirarka ay ka qayb galaan hay'adaha dawladda iyo daneeyayaasha arrimaha dadka naafada ah, kuwaas oo lagu eegayo horumarinta siyaasadaha khuseeya dadka naafada ah, iyo falanqaynta habsami u socodka iyo hirgelinta qorshayaasha Qaran ee dadka naafada ah;

k) Hubiso, isla markaana diiwaan geliso dadka naafada ah;

l) Doonto, bixiso, ama fududayso helista qalabyada kala gaddisan ee caawiya qaybaha kala duwan ee dadka naafada ah;

m) Maamusho sanduuq gaar ah oo loo qoondeeyo horumarinta nolosha dadka naafada ah, warbixinna ka siiso WHHXI iyo Hantidhowrka Guud;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

n) Abuurto xiriir wada shaqayn, oo ay la yeelato hay'adaha dawliga ah iyo kuwa madaxa bannaan intaba iyada oo xiriiradaas uga faa'iidaynaysa danaha dadka naafada ah;

o) Fududayso dhismaha Gole Naafo oo Madax bannaan, kaas oo ay ku kulansan yihiin qaybaha kala duwan ee dadka naafada ah, oo ilaalin doona danaha dadka naafada ah.

p) U abaabusho, uña doonto dadka naafada ah ilo dhaqaale oo awood u siisa isku filnaan;

q) Hay'addu waxa ay qaban kartaa wixii kale ee ay dani ugu jirto dadka naafada ah ee aanu xeerkani tilmaamin.

3. Hay'addu waxa ay leedahay awood ay ku oogto dacwad cid ama hay'ad kasta, ha ahaato mid dowladeed ama mid gaar ah, oo ku xad gudubta, ka hor timaadda, ama ka gaabisa hirgelinta sharciga xuquuqda dadka naafada ah iyo shuruucda kale ee la xiriirta, ayadoo u marayso qaabka loo dhaqaajiyo Dacwadaha Hay'adaha Dowladda ama gaarka ah.

4. Dhammaan hay'adaha dawladda ama kuwa gaarka ah, hay'adaha iyo shirkadaha shisheeyaha, kuwa gaarka ah, Xafiisyada Qaramada Midoobay waa in ay fursadaha shaqo ka siiyaan qoondo ay leeyihiin dadka naafada ah, laguna saleeyo u dheelli tirnaan jinsi, si waafaqsan sharcigan iyo qaanuunka iyo Heshiisyada Caalamiga ah.

## Qodobka 6aad:

## Qaab-dhismeedka Hay'adda

1. Hay'addu, si ay hawsheeda u fuliso, waxa ay yeelanaysaa:

a) Guddiga Sare ee Maamulka Hay'adda Qaranka ee Dadka Naafada ah, waxa uu ka koobanyahay shan (5) xubnood, dhamaantood na waa in ay ka yimaadaan dadka naafada ah.

b) Agaasimeyaasha iyo hawlwadeennada kale ee loo baahdo, waa in ay ku jiraan qaybaha kala duwan ee dadka naafada ah, kuwaas oo lab iyo dhadig ba leh.

2. Hay'addu waxay yeelan kartaa guddiyo qabta hawlo kala gaar ah. Guddiyadaas, shaqooyinkooda, iyo tirada shirarkoodu ku guntamaan, waxaa lagu faahfaahin doonaa xeer hoosaadka Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, iyadoo lagu salaynayo dheelitirnaan jinsi ah iyo shuruucda Dalka.

3. Waajibaadka Guddi-hoosaadyada, waxaa lagu qeexayaa xeer-hoosaad u gaar ah oo ay Guddiga Sare ku soo saarayaan kulammadooda ugu horreeya.

4. Waxaa kaloo Xeer hoosaadka lagu nidaaminayaa anshaxa iyo habraaca anshax marinta madaxda maamulka iyo shaqaalaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, si waafaqsan shuruucda Dalka iyo shaqaalaha hay'adaha madaxa bannaan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Qodobka 7aad:

## Guddiga Sare ee Maamulka Hay'adda.

1. Guddiga Sare ee Hay'addu waxa uu ka kooban yahay:
   a) Guddoomiyaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah.
   b) Guddoomiye Ku-xigeenka Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah.
   c) Saddex xubnood oo leh aqoon iyo khibrad, oo mid ka mid ah uu yahay Xoghayaha laguna magacaabo sida ku xusan qodobka 2aad xarafkiisa J.
2. Xubnaha Guddiga Sare iyo saraakiisha sar sare ee Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, loo magacaabayo waa in ay noqdaan kuwo lagu xulay aqoonta iyo waaya aragnimada ay u leeyihiin:
   a) Ilaalinta xuquuqda dadka naafada ah;
   b) Xuquuqda aadanaha iyo shuruucda kale ee Caalamiga ah;
   c) Wax u qabadka bulshada iyo ka shaqaynta horumarkooda.
   d) Xubnaha guddiga iyo Saraakiisha Sare ee Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, waa inay leeyihiin aqoon heer Jaamacadeed ah ama aqoon u dhiganta iyo khibrad shaqo oo ugu yaraan shan sano ah.

## Qodobka 8aad:

## Waajibaadka Xubnaha Guddiga Sare ee Maamulka.

1. Dejinta qorshaha siyaasadeed ee Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, kaas oo dadka naafada ah gaarsiinaya in ay helaan xuquuqda ay leeyihiin muwaadin ahaan, iyada oo la tixgelinayo baahiyahooda gaarka ah iyo awoodda dhaqaale ee Dalka.
2. Dabagalka iyo hubinta sidii loo meel mariyey siyaasadda iyo Qorsho hawleedka Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah;
3. Ansixinta miisaaniyadda iyo xisaabxirka Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, ee uu soo hordhigo Guddoomiyaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, ka dibna loo gudbiyo Wasaaradda.
4. Gacan-siinta guddoomiyaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, dhanka horumarinta istiraatijiyadda iyo qorshaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, hawlaheeda lagu hagaajinayo;
5. Guddiga waxaa isugu yeeraya Guddoomiyaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, ama markuu maqan yahay waxaa matalaya Guddoomiye Ku Xigeenka, wuxuuna yeelanayaa ugu yaraan bishii hal fadhi oo caadi ah iyo markii kale ee loo baahdo;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Qodobka 9aad:

## Xilka iyo Awoodda Guddoomiyaha Hay'adda.

Guddoomiyaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, waa madaxa xubnaha Guddiga Sare ee Maamulka iyo Hoggaanka maamulka Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, mas'uulna ka ah waajibaadka fulineed ee hawlaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, si waafaqsan sharcigan iyo xeer-hoosaadka Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, siyaasadda iyo shuruucda Dalka; wuxuuna yeelanayaa awoodaha iyo waajibaadyada hoos ku qoran:

1. Ilaalinta awoodaha iyo waajibaadka Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, ee sida ku cad qodobka 5-aad ee sharcigaan.
2. Maaraynta, isku-duwidda iyo kormeerka hawlaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah loo dhisay iyo hawlwadeennadeeda, si waafaqsan siyaasadda iyo sharciyada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
3. Xiriirinta hawlaha adeegga ee Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, kala dhexeeya hay'adaha qaranka, hay'adaha caalamka iyo samafallada, horumarinta iyo ciddii kale ee ay khusayso wax u qabashada dadka naafada ah;
4. Matalaadda arrimaha shaqo ee khuseeya dadka naafada ah iyo saxiixa heshiisyada ay hay'addu la galayso hay'adaha samafalka iyo kuwa caalamiga ah, iyadoo lala kaashanayo Garyaqaanka Guud ee Dowladda, si waafaqsan shuruucda Dalka iyo kuwa caalamkaba waxayna nuqul heshiisyadaas iyo warbixinba siinayaan WHHXI;
5. Diyaarinta iyo abaabulidda qorshayaal dhaxalgal ah ee waqtiyaysan oo lagu maamulayo, laguna fulinayo mashaariicda horumarineed oo loogu talo galay dadka naafada ah, iyo sidoo kale, diyaarinta iyo dhaqangelinta mashaariicda awood u siinaya, in dadka naafada ah noloshooda maareeyaan, gaaraanna isku filnaan, kana qayb-qaataan horumarka iyo dhismaha Dalka;
6. Ka shaqaynta hirgelinta qorshayaasha qaran ee ku aaddan dadka naafada ah, iyada oo lala tashanayo wasaaradaha xukuumadda ee ay kala khusayso iyo hay'adaha caalamiga ah ee arrimahaas ku shaqada leh.
7. Maamulidda xarumaha iyo wixii tashiilaad ah ee loogu adeegayo dadka naafada ah, iyadoo lala kaashanayo hay'adaha qaranka iyo kuwa dowliga ah ee ay khusayso.
8. Abuuridda waaxyo shaqo-fulineed iyo kuwo latalin oo ay ansixinayaan Guddiga Sare ee Maamulku sida ku cad xeer hoosaadka, isagoo ku kormeeraya habka shaqo fulinteeda oo uu u abaabulan xog aqooneed iyo qalab shaqo oo lagu fuliyo mashaariic wax gal ah oo waqtiyaysan;
9. Fulinta shaqooyinkii kale ee muhim u ah gaaridda ujeedada Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah oo uu sharcigu u ogol yahay;
10. Ka dib ansixinta Golaha Wasiirada ee shanta xubnood ee Hogaanka Hay'adda, Guddoomiyaha waxa Xeer ku soo saraaya Madaxwaynaha JFS, waxaana lagu baahinayaa faafinta rasmiga ah ee dawladda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

11. Xil ka qaadista Guddoomiyaha waxaa loo marayaa isla habkii lagu soo magacaabay.
12. Muddada xil haynta guddoomiyaha Hay'addu waa afar (4) sano oo hal mar la cusboonaysiin karo.

## Qodobka 10aad:

## Ku-Xigeenka Guddoomiyaha Hay'adda.

1. Hay'addu waxay yeelanaysaa guddoomiye ku-xigeen.
2. Ka dib ansixinta Golaha Wasiirada ee shanta xubnood ee Hogaanka Hay'adda, Gudoomiye ku Xigeenka waxa Xeer ku soo saraaya Madaxwaynaha JFS, waxaana lagu baahinayaa faafinta rasmiga ah ee dawladda.
3. Xil ka qaadista Guddoomiye ku xigeen ka waxaa loo marayaa isla habkii lagu soo magacaabay.
4. Muddada xil haynta Guddoomiye Ku-xigeenku waa afar (4) sano oo hal mar oo kali ah la cusboonaysiin karo.
5. Guddoomiye ku-xigeenku waxa uu xubin ka yahay Guddiga Sare ee Maamulka Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah.
6. Guddoomiye ku-xigeenku waxa uu sii wadayaa hawlaha caadiga ah ee
7. Guddoomiyaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, haddii ay timaaddo xaalado uusan hawshiisa sii wadi karin, sida bukaan, geeri, safar uu u baxo, amaba xilkoo laga joojiyo ama si sharci ah looga qaado.
8. Waxa uu Guddoomiye ku-xigeenku fuliyaa wixii hawl kale ah ee Guddoomiyaha Hay'addu u xil saaro.

## Qodobka 11aad:

## Shaqaalaha.

1. Xuquuqda iyo waajibaadka sharciga ah iyo xuquuqda dhaqaale ee shaqaalaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, waxaa lagu dhaqayaa Sharciga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda;
2. U tartamidda shaqaalaha Hay'adda Qarranka ee Dadka Naafada ah, waxaa uu noqonayaa tartan furan, iyada oo la raacaayo shuruucda dalka ee shaqaalaynta, mudnaan gaar ah na la siinayo dadka naafada ah.
3. Waalidka caruur naafo ah, ama caruurta waalid naafo ah, Hadii ay buuxiyaan shuruudaha shaqooyinka ka banaanaada Hay'adda, waxa la siinayaa mudnaan gaar ah.
4. Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, iyo mashruucyadeedu waxay awood u leeyihiin in ay qortaan shaqaale farsamo yaqaan ah ama xirfad gaar ahaaneed leh, haddii laga waayo cid buuxisa shuruudahaas dadka naafada ah, iyadoo la raacayo shuruudaha shaqo qorista ee xeerka shaqaalaha ee Dalka.

5. Hay'addu waxay Dalka dibaddiisa ka keensan kartaa khubaro markii loo baahdo, haddii laga waayo Dalka gudihiisa cid leh aqoonta loo baahan yahay waxaana la raacayaa sharciga shaqaalaha shisheeye ee Dalka.

## Qodobka 12aad:

## Dhowrista Xogta Dadka Naafada ah.

1. Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, waxaa waajib ku ah in ay ilaaliso dhammaan xogta dadka naafada ah ee ay u adeegayso.
2. Shaqaale, wakiil iyo cid kale midkoodna ma gudbin karo xog qarsoodi ah sida uu qabo sharcigani, marka laga reebo:
   a) Ogolaansho sababaysan waafaqsanna sharciga oo ay wadar ahaan u gaaraan Guddiga Sare ee Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, ama;
   b) Fulin hawleed sharcigani u ogolaanayo;
   c) Amar maxkamadeed oo sharciga waafaqsan;
3. Cidii ku xadgudubta sharcigan waxay galaysaa fal dambiyadeed faafin xog dhawrsan waxaana laga qaadayaa tallaabo waafaqsan sharciga Ciqaabta Dalka.

## Qodobka 13aad:

## Miisaaniyadda iyo Hantida Hay'adda.

1. Hantida Hay'addu waxay ka kooban tahay:
   a) Miisaaniyadda sannadlaha ah ee Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, ee ay qorshayso xukuumaddu.
   b) Wixii hibo ama kab dhaqaale ee uga yimaada hay'adaha caalamiga, shaqsiyaad, ururro gudaha ama dibadda ah.
   c) Dakhliga ka soo xarooda mashaariicda Hay'addu ay maamusho.
   d) Hanti kasta oo dawladeed, guurto ama ma guurto, ee loogu adeegi jiray dadka naafada ah, waxa yeelanaaya maamulkeeda Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah marka uu sharcigani dhaqan galo. Hantida ay Hay'addu yeelan doonto, ma ku jirto wixii hanti ah ee ay gaar u lahaan jireen, amaba hadda ay leeyihiin dad naaffo ah, iskaashatooyin naafo ama ururo dad naafo ah.
2. Guddoomiyaha Hay'addu, ka dib marka uu ka doodo, oggolaadana Guddiga Sare ee Maamulka, waxa uu Wasiirka Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka u gudbinayaa miisaaniyad-sannadeedka si looga ansixiyo Golaha Wasiirrada;
3. Kharashka iyo isticmaalka dhaqaalaha iyo hantida soo gasha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, lagu dhaqayaa Sharciga xisaabaadka iyo baarista ee hantida dowladda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Qodobka 14aad:

## Warbixin Sanadeedka Hay'adda.

Guddoomiyaha Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, waxaa laga doonayaa in uu diyaariyo warbixin sannadeedka Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, oo dhammaystiran isaga oo u gudbinaya Wasiirka HHXI si loo hor dhigo Golaha Wasiirrada taas oo ay ku jiraan hawlaha shaqo iyo waxqabad ee Hay'adda Dadka Naafada ah, iyo sidoo kale xaaladaha culays ee la soo gudboonaada Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah.

## Qodobka 15aad:

## Canshuur dhaaf.

1. Hay'addu waxay leedahay cashuur dhaaf buuxa heer federaal iyo heer dawlad goboleedba, kaas oo la xariira kaalmooyinka, deeqaha ay ka hesho gudaha iyo dibadda, iyo dakhliga uga soo baxa ilaha dhaqaalaha ee ay Hay'addu leedahay, iyo guud ahaan wixii ay Hay'addu dhoofiso ama la soo dagayso.
2. Waxaa ka reebban haddii ay Hay'addu yeelato howlo ganacsi oo ujeeddadeedu tahay faa'iida-doon, waxaa lagu dhaqi doonaa sharciga Hay'adaha Dalka.

## Qodobka 16aad:

## Ammaah.

Hay'addu waxay awood u leedahay inay ammaah qaadato, bixisana, ha noqoto dalka gudihiisa ama dibeddiisaba, ka dib oggolaashaha Wasiirka Wasaaradda u xilsaaran arrimaha dadka Naafada ah, iyada oo la raacayo Xeerarka iyo sharciyada Dalka.

## Qodobka 17aad:

## Hanti-dhawrka Hay'adda

Xisaabaadka hay'adda Dadka Naafada ah, waxaa lagu dhaqayaa nidaamka maamulka xisaabaadka hay'adaha madaxa bannaan ee qaranka.

## Qodobka 18aad:

## Qaybaha Hay'adda.

Hay'addu waxa ay yeelan kartaa mashruucyo kala duwan oo mid walba, uu yeelan karo maareeyn iyo maamul u gaar ah, isla markaasna si toos ah u hoos yimaada Guddiga Sare ee Hay'àdda Qaran ee Dadka Naafada ah. Faah faahinta qodobkaan waxaa lagu qeexi doonaa xeer hoosaadka Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah.

## Qodobka 19 aad:

## Xarun iyo Laamo

1. Xarunta Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada ah, waa caasimadda Dalka ee Muqdisho, waxayna laamo ku yeelan kartaa Dawlad-goboleedyada iyo gobollada Dalka hadba sidii loogu baahdo.
2. Laamaha Dawlad-goboleedyadu waxay toos ula shaqaynayaan Hay'adda Dadka Naafada ah, iyo hadba mas'uuliyiinta Dowlad-goboleedyada ee u xilsaaran u adeegidda dadka naafada ah.

## Qodobka 20aad:

## Baabi'in Xeer

Sharci iyo Xeer kasta oo aan la socon karin ama ka soo hor jeeda xeerkan waa la baabi'iyay, waxayna Hay'adda Qaranka ee Dadka Naafada ahi, marka uu xeerkani dhaqan galo yeelaneysaa masuuliyadda u adeegista dadka Naafada ah ee J.F.S.

## Qodobka 21 aad:

## Dhaqan-gal.

Xeerkan waxa uu dhaqan gelayaa marka ay ansixiyaan Golayaasha Baarlamaanka, uuna saxiixo Madaxweynaha JFS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

**Dhammaad**

Tusmo

Sharciga Aasaaska Hay'adda Qaran ee Dadka Naafada Ah............ 1
Gogoldhig ............ 1
Qodobka 1aad: ............ 2
Qeexid............ 2
Qodobka 2aad: ............ 3
Dhismaha Hay'adda Qaranka ee Dadka Naafada Ah............ 3
Qodobka 3aad: ............ 4
Saldhigga Sharci ee Hay'adda............ 4
Qodobka 4aad: ............ 4
Maqaamka Hay'adda. ............ 4
Qodobka 5aad: ............ 4
Xilka iyo Waajibaadka Hay'adda............ 4
Qodobka 6aad: ............ 6
Qaab-dhismeedka Hay'adda ............ 6
Qodobka 7aad: ............ 7
Guddiga Sare ee Maamulka Hay'adda. ............ 7
Qodobka 8aad: ............ 7
Waajibaadka Xubnaha Guddiga Sare ee Maamulka. ............ 7
Qodobka 9aad: ............ 8
Xilka iyo Awoodda Guddoomiyaha Hay'adda. ............ 8
Qodobka 10aad: ............ 9
Ku-Xigeenka Guddoomiyaha Hay'adda............ 9
Qodobka 11aad: ............ 9
Shaqaalaha............ 9
Qodobka 12aad: ............ 10
Dhowrista Xogta Dadka Naafada ah............ 10
Qodobka 13aad: ............ 10
Miisaaniyadda iyo Hantida Hay'adda. ............ 10
Qodobka 14aad: ............ 11
Warbixin Sanadeedka Hay'adda. ............ 11
Qodobka 15aad: ............ 11
Canshuur dhaaf. ............ 11
Qodobka 16aad: ............ 11
Ammaah. ............ 11
Qodobka 17aad: ............ 11
Hanti-dhawrka Hay'adda ............ 11
Qodobka 18aad: ............ 12
Qaybaha Hay'adda. ............ 12
Qodobka 19 aad: ............ 12
Xarun iyo Laamo ............ 12
Qodobka 20aad: ............ 12
Baabi'in Xeer ............ 12
Qodobka 21 aad: ............ 12
Dhaqan-gal. ............ 12

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

Golaha Aqalka Sare
The Upper House
27 NOV 2018
SOO GELID / RECEIVED

# ANSIXINTA SHARCIGA DHISMAHA HAY'ADDA QARAN EE DADKA NAAFADA AH

| Senatarrada Codeeyay | Oggolaaday | Diiday | Ka Aamusay |
|---|---|---|---|
| 31 | 31 | 0 | 0 |

| Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi | **Taariikh:** 12ka Diseembar 2018 |

| Guddoomiye Ku Xigeenka Kowaad ee Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Abshir Maxamed Axmed | **Taariikh:** 12ka Diseembar 2018 |

| Guddoomiye Ku Xigeenka Labaad ee Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Mowliid Xuseen Guhaad | **Taariikh:** 12ka Diseembar 2018 |